CARINA

**Carina waa adeeg bilaash ah oo isku beega bixiyayaasha daryeelka guriga ee Medicaid iyo Barnaamijka Dadka Waayeelka ah ee Oregon Lagu Taageero (OPI) iyo dadka raadinaya in la daryeelo. Qalabka onlaynka ee Carina waxaa lagu heli karaa Ingiriis, Isbaanish iyo Ruush.**

Si aad u sameysato akoon Carina oo bilaash ah oo aadna u hesho daryeel bixiyayaasha kuu dhaw:

1. Aad carina.org/homecare/medicaid/oregon/ ama iskaan-garee koodhka QR-ka.
2. Guji "Join for Free (Ugu Soo biir si Bilaash ah)."
3. Ku dhammaystir isku-diiwaangelinta ka ahaan "Consumer (Macmiil)" adigoo gelinaaya Aqoonsigaaga Macmiilka (Prime Number) ee ku qoran kaarkaada Oregon Health ID (Aqoonsiga Caafimaadka ee Oregon).
4. Marka aad dhameystirto is-diiwaangelinta, waxaad soo dhajin kartaa shaqooyinka oo aadna farriin u diri kartaa daryeel bixiyayaasha kuu dhaw. Daryeel bixiyayaasha xiisanaya shaqadaada ayaa sidoo kale farriin kuu soo diri karaan.
5. Suurtagalnimada iney kula soo xidhiidhaan daryeel bixiyayaal, jadwaleyso wakhti aad ku wada hadashaan telefoonka oo aadna fool-ka-fool ahaan ula kulanto si aad uga qaado waraysi. Marka aad hesho qofka shaqada ku habboon, kala shaqee maamulaha kiiskaada si aad u xaqiijisaan daryeel bixiyahaaga cusub.

Haddii aad qabto wax dhibaatooyin ah, fadlan wac 1-855-796-0605 ama booqo carina.org/contactus/.

Maareeyayaasha kiisaska macaamiisha ayaa sidoo kale shaqooyinka kuu soo dhigi kara oo fariimo u diri kara bixiyeyaasha daryeelka iyagoo adiga ku metalaya. Kala xiriir maareeyaha kiiskaada wixii taageero ah.

Carina waa 100% waa bilaash iyada oo loo marayo iskaashi ka dhexeeya Carewell SEIU 503, barnaamijka RISE Partnership, iyo ururka xooga-shaqada SEIU Local 503, iyo sidoo kale Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon (Oregon Home Care Commission, OHCC). Dhammaan adeegsadayaasha Carina waa la xaqiijiyey aqoonsigooda.

Carewell SEIU503
Delivered by RISE Partnership

LOCAL 503 SEIU Stronger Together

OREGON Home Care COMMISSION